




Daawadaada

Guriga

- Wac farmashiyeyaal badan oo weydii inta dawadaadu ku kici doonto - qiimaha wuu unkala duwanaan karaa xitaa farmashiyeyaal xiriir ah.
- Ka raadi onlaynka websaydyada qaymo-dhimista si aad isbarbardhig ugu sameysid qiimaha daawooyinka oo raadso onlaynka kuubannada.
- Wac shirkadaada caymiska. Shirkadaha qaar waxay ku siin doonaan 'caymis safar' si loo daboolo daawooyinka loo qoro safarada ka badan 30 maalmood.
 - Waxaad u baahan kartaa inaad horay u bixiso qiimaha buuxa ee daawadaada balse waxaad codsan kartaa lacag celin adigoo buuxinaya foomka qaansheegashada una dirayo shirkadaada caymiska markaad soo laabato
- Wac xafiiska dhakhtarkaaga una sharrax arrintaada (sida inaad heli kweydo kiniiniyo kugu filan ama inay daawada dhakhtarku qoro aad qaali u tahay) oo codso daawo beddel ah.

Waxa la Sameeyo Haddii
Daawada Safarkaaga ay
Aad Qaali u Tahay



***Immisa Ayay Ku
KACAYSAA?!?***

Immisa Ayay Ku KACAYSAA?!?



Dhakhtarka

Dhakhtarka

- U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad qorsheyneyso inaad u safarto dalka dibaddiisa. U sheeg meesha aad u socto iyo muddada aad safri doontid. Dhakhtarkaagu wuxuu ku siin karaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo ilaaliyo caafimaadkaaga, oo ay ku jiraan habab aad adiga iyo qoyskaaga isaga ilaalisaan duumada.
- Haddii aadan lahaeyn caymis ama aad haysan Medicaid/ Medicare, u sheeg dhakhtarkaaga inaad ka walwaleyso kharashyada daawada iyo inaad u baahantahay daawada ugu kharash jaban.
- U sheeg dhakhtarkaaga inuu ku siiyo warqad daawo haddii aad qorsheynaysid inaad wax kaga iibsatid agagaarka qiimaha ugu fiican ee daawadaada.
- Weydii dhakhtarkaaga inuu hayo wax fikrado ah oo ku saabsan sida loo dhimi karo qiimaha daawadaada.

Waxa la Sameeyo Haddii Daawada Safarkaaga ay Aad Qaali u Tahay



Farmashiyaha

Farmashiyaha

- Weydii farmashiistaha inuu ku siin karo daawo guud ama daawo qiimo jaban.
- Weydii farmashiistaha inuu ogyahay wax ku saabsan kaararka ama kuubannada qaymo-dhimista ee daawadaada.
- U sheeg farmashiistaha inuu waco xafiiska dhakhtarkaaga si uu kuugu beddelo daawo aad awoodi karto.
- Haddii daawada la qoray loogu diray farmashiga si elektaroonig ahaan, weydii iyaga inay u gudbiyaan warqada daawada farmashi kale haddii aad hesho qiimo ka fiican.

651-201-5414
www.health.state.mn.us
9/2021

